



Sharcigu Wuxuu siiyaa Dhamaan Bukaanaada Xuquuqdaan

- In lagu siiyo qoraal iyo sharaxaad afka ah oo xuquuqdaada ku saabsan
- In lagu sheego wixii laga helo, daaweyntaada iyo khatarta ka iman karta daaweynta
- Inaad ka hesho aragti labaad xagga hellida waxaad qabto iyo daaweynta dhakhtar cusub oo cilmi nafs ah
- Inaad haysato Qorshe Daaweyneed kaas oo tixgeliya waxaad rabto iyo daaweynta kale oo la helli karo, iyo inaad weydiisato bedelida qorshaha
- Inaad codsato dhakhtar cusub, kalkaaliye caafimaad ama maamulaha kayska
- Inaad diido daaweynta ku salaysan habka loo yaqaan electroconvulsive therapy, haddii aanay ahayn in aan la awoodin in lagu siiyo wargelinta ka raalinoqoshada iyo in shuruudaha kale wax laga qabtay, ama haddii aan degdeg loogu baahnayn
- In aad hesho hab ixtiraamaya diintaada, dhaqankaaga, da'daada, lab iyo dhadig midkaad tahay, luqada iyo baahiyaha kale ee gaarka ah
- Inaad codsato talo sharci iyo in lagu matalo
- Inaad codsato bixid
- In aan la faragelin xoriyadaada, sharaftaada, barayfasigaaga iyo wax hoos loogu dhigo sharaftaada
- In wax lagu weydiiyo jawaabtana aad u hesho si aad fahmi karto
- Inaad aragto waxa ku qoran faylkaaga, marka laga saaro waxa sharci ahaan laga saaray
- Inaad hesho xaqa lagu ilaalinayo macluumaadka qarsoodiga kuu ah, marka laga saaro wax sharcigu ogol yahay, ama haddii aad ogolaatay in cid la wadaagto
- In aadan qaadan daawo tijaabin ah haddii aadan bixin ogolaansho aad fahamsan tahay
- Inaad ka dacwooto wax kasta oo aad qabto lana xaajooto kooxda ku dawaynaysa
- In hayntaada aan lagaala tashan, Amarada Ku-dawaynta Bulshada dhexdeeda iyo Qorshaha Dawaynta dib loo eego 8 asbuuc gudahood, dabadeedna hal mar 12kii biloodba
- Inaad rafcaan ka qaadato haynta aan lagaala tashan, Amarada Ku-dawaynta Bulshada dhexdeeda ama Qorshaha Dawaynta mar kasta
- In aad xor ka ahaato takoorida
- Inaad ka doodo amarada laguugu magacaabay maamulayaal iyo Masuuliyiin
- Inaad hesho adeegyada caafimaadka dhibirka oo ugu fiican, kuwaas oo u dhigma kuwa ay helli karaan dadka qaba cudurada kale

Ka afeefashada Masuuliyada

Xarunta Sharciga Caafimaadka Dhibirku waxay ka afeefanaysaa fal kasta oo loo qaaday ama aan la qaadin macluumaadkaan dartiis. Waxaanu ku dhiirigelinaynaa akhristayaasha inay raadsadaan talo sharci iyo cid matasha mar kasta oo ay suurtagal tahay.

Tel: MHLC 9629 4422 ama 1800 555 887, VLA ama Garyaqaan Gaara wixii macluumaada oo intaas ka badan
11/10/2005 Reg No. A0013662S ABN No: 30996141084 © MENTAL HEALTH LEGAL CENTRE INC